

**Xeerka lamba. 79 ee 18 Maayo 1956 rep  
Dhismaha Xafiisyada Gaarka ah ee AFIS**

**MAAMULAHU GUUD**

Kadib marki la arkay sharciga lamba. 1301 ee 4 Nofember 1951 ee Jamhuuriyada Talyaaniga oo ansixinayaa fulinta Heshiiska Maamulida ee Dalka Somaliya iyo amarradda ku xig xigay;

Kadib markii la arkay sharciga lamba. 7 Maay 1956 ee la xiriira dhismaha Dowlada Somaliyed;

Kadib markii la dhegeystay Guddiga Maamulka;

Kadib markii la garoowsaday baahida loo qabo in la dib loo nidaamiyo Xafiisyada Maamulka Wasaayada Talyaniga ee Somaliya.

**WAXAA LA AMRAY**

**Qod. 1**

Waxaa la dhisay xafiisyada gaarka ee Maamulka Wasaayada Talyaniga ee Somaliya:

- Xafiiska Gaarka ee Arrimaha Gudaha;
- Xafiiska Gaarka ee Arrimaha Bulshada;
- Xafiiska Gaarka ee Arrimaha Dhaqaalaha;
- Xafiiska Gaarka ee Arrimaha Maaliyeed;
- Xafiiska Gaarka ee Arrimaha Guud.

**Qod. 2**

Xafiiska Gaarka ee Arrimaha Gudaha wuxuu qaabilsan yahay arrimmaaan hoos ku qoran:

- a) Maamulka Ciidanka Booliska;
- b) Maamulka Guddenka Militariga Talyaniga ee Muqdisho;
- c) Maamulka Ciidanka Cirka;
- d) Adeega diwaanka dadweynaha iyo qoyska;
- e) Takuuleynta iyo dib u dhoofinta;
- f) Bassaboradda iyo warqadaha celista, dal ku galka Talyaniga;
- g) Militarigii hore iyo kuwa ku curyao iyo arrimaha khuseeya;
- h) Gunnoyinka howlgabnimada ee Dowladda Talyaniga oo Somaliya gudaheeda lagu bixiyo;
- i) Adeegga deynta;
- l) Qabuuraha iyo Ossario ee Muqdisho.

**Qod. 3**

Xafiiska Gaarka ee Arrimaha Bulshada wuxuu qaabilsan yahay:

- a) Maamulidda iyo kormeerka Dugsiyada talyaniga ee Somaliya;
- b) Ururaha dhaqanka Talyaniga;
- c) Tabaruca Vicariato Apostolico;
- d) Deeqaha waxbarashada ee dibedda iyo Rugta Waxbarashada ee Talyaniga;

- e) Hey'adaha caafimadka ee Talyaniga;
- f) Xirira hey'adaha dibedda ama caalamiga ee la xiriira arrimaha.

#### **Qod. 4**

Xafiiska Gaarka ee Arrimaha Dhaqaalah waxay fulin doontaa:

- a) Qorshaha horumarinta dhaqaalahaa ee Somaliya iyo maamulka la xiriira;
- b) Ganacsiga dibedda, misaaniyada ganacsiga iyo kharajyada;
- c) Xiriira hey'adaha dibedda ama caalamiga.

#### **Qod. 5**

XAFIISKA GAARKA EE ARRIMAHAA MAALIYADDU wuxuu qaabilسان  
yahay:

- a) Qorsheynta maaliyada;
- b) Dhaqdhqaayada maaliyada iyo waxbinnada maaliyada ee dibedda;
- c) Kala qeybinta tabaruca maaliyada ee talyaniga;
- d) Misaaniyadda hor dhaca ah ee Maamulka iyo midka la isticmaalay;
- e) Qaabka lacagta iyo wareega lacageed;
- f) Kormeerka hey'adaha amaahda;
- g) Qasaaradaha dagaalka iyo magdhawga ee ku tilmaaman Heshiiska Londra;
- h) Dhismaha Ciidanka Somaliya;
- i) Deeganadda Dowliga ah.

#### **Qod. 6**

Xafiiska gaarka ee Arrimaha Guud waxaa uu fulin doonaa howlaha hoos ku  
qoran:

- a) Maamulida shaqalahaa Talyaniga ee Dowladda iyo shaqaalahaa Talyaniga oo  
lagu keenay heshiis shaqo ee deegan;
- b) Howlaha adeegyada Maamulka.

#### **Qod. 7**

Waxba laguma kordhin howlahda la xirira awooda Guddiga iyo hey'adaha  
kormeerka.

#### **Qod. 8**

Waaxyada teknika ee Dowladda Somaliyeed waxaay hoos imaan doonaan  
xafiisyada Gaarka ah ee fulinaya mashaaricta la xiriirta.

#### **Qod. 9**

Kala qeexidda howlaha u dhixeyaa Dowladda Somaliyeed iyo Xafiisyada  
Gaarka ah iyo micnaynta amarrada khuseeya Dowladda Somaliyeed iyo Xafiisyada  
Gaarka aha waxaa iska leh Maamulaha Guud.

#### **Qod. 10**

Amarkasta ka soo hor jeedo xeer nidamiyahaan waa la buriyey.

## **Qod. 11**

Dekreetadani wuxuu hirgeli doonta maalinta lagu soo daabaco Faafinta Rasmiga.

Muqdisho, 18 Maayo 1956.

Maamulaha

**Anzilotti**

Waxaa la arkay lamba. 305 ee 28 Maayo 1956

Agaasimaha Xisabaadka: **Tura**

Waxaa la arkay la diiwan geliyey diwaanka 16 bogga lamba. 113

Muqdisho 28 Maayo 1956

Xisaabiyaha Guud: **Spadaro**